



Seattle
Office of Sustainability
& Environment

Codso Lacagta Caddaaladda Deegaanka ee Seattle

Xafiiska Joogteynta & Deegaanka Seattle (OSE) wuxuu ku faraxsan yahay inuu ku dhawaaqo in [Lacagta Caddaaladda Deegaanka](#) uuna **hadda aqbalayo codsiyada**. Sannadkan, \$250,000 ayaa diyaar ah si loogu taageero mashaariicda ay hogaaminayaan kana faa'iidayanayan bulshooyinka ay sida aadka ah u saameeyeen arrimaha deegaanka iyo cimilada. Tan waxaa ku jira Dadka Madow, Asalkii hore, Dadka midabka leh, soo-galootiga, qaxootiga, dadka dakhligoodu hooseeyo, dhalinyarada, iyo waayeelka.

Codsiyada waa la aqbali doonaa oo dib loo eegi doonaa si isdaba joog ah ***ilaa wadarta maalgelinta la bixiyo ama 5pm (PT), Oktoobar 20, 2024, hadba kii soo horreeya***. Codsadayaasha xaqa u leh waxay codsan karaan \$10,000 ama deeq \$25,000 ah.

Maalgelintan waxaa loogu talagalay qabaa'ilka iyo ururada qabaa'ilka, ururada aan faa'iido doonka ahayn, iyo kooxaha bulshada ee la shaqeeya bulshadooda si ay u horumariyaan deegaanka iyo cadaaladda cimilada. Ururka ama kooxda bulshada ee xaqa u leh waa in ay lahaadaan *cel-celiska miisaaniyad dhan \$500,000 ama ka yar* sanad xisaabeedka hada iyo kii ka horeeyay. Mashruucyadu waxay diiradda saari karaan, laakiin aan ku xaddidnayn, fanka iyo sheeko-wadaaga, waxbarashada bulshada, dhisidda awoodda hay'adaha iyo bulshada, la qabsiga isbeddelka cimilada iyo adkeysiga, dhisidda xirfadaha iyo tababarrada la xiriira shaqooyinka cagaaran*, iyo qorsheynta bulshada iyo aragtida.

Haddii aad xiisaynayso inaad wax badan ka ogaato Lacagtan, ka doodista fikradda mashruuca, ama soo gudbiso fikrad ku saabsan mashruuca, fadlan qaad tilaabooyinka soo socda:

- limeel u dir equityenviro@seattle.gov si aad ula kulanto La-taliye Kaalmo Farsamo. *Tan waxaa si xoog leh loogu dhiirigelinaya dhamaan codsabayaasha xiiseynaya.*
- Ka qaybgal mid ka mid ah labada kulan ee macluumaadka khadka.
 - *Talaado, Agoosto 27th 12pm-1pm* [xiriirka zoom halkan](#)
 - *Isniin, Sebtember 9^{-keeda} 6pm-7pm* [xiriirka zoomka halkan](#)

Waxaan sidoo kale diyaar u nahay inaan kaga jawaabno su'aalaha iimaylka anago si adag ugu dhiirigelinayna codsabayaasha xiisaynaya inay nalaga soo xiriiraan equityenviro@seattle.gov. Waxa kale oo aad booqan kartaa seattle.gov/environment/ejfund si aad wax badan uga ogaato, u codsato, oo aad u hubiso heerka maalgelinta la heli karo.

* Ujeedada Lacagta EJ, shaqooyinka cagaarka ah waxaa lagu qeexaa shaqooyin iyo xirfado la xiriira macnaha guud ee wax ka qabashada isbedelka cimilada iyo joogtaynta.

